
TAXANAHA DHAXALREEB I/2007
Abriil 2007 Ponte Invisibile Ed.

# Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga




Jama Musse Jama

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi karo jmgurey@gmail.com**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Abriil 2007 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*.

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal*.

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga

*Jama Musse Jama*

*jmgurey@gmail.com*

HORDHAC

Tiro waa aragti dahsoon oo u taagnaan karta qiimayn, hilaadin ama cabbiraad. Astaamaha lagu tilmaansado tirooyinka waxaa la yidhaahdaa asto tiro. Habka dhaqanka ee tirinta afsoomaaliguna waa habdhismeed salkiisu yahay tobanle; waxaa ku jira *eber* iyo *dhammaad li'i*, waxaana uu bah la wadaagaa habka tirinta ee afafka kushitigga (kushitig waxaa la isku yidhaahdaa afafka laga hadlo Bariga Afrika ee ay ka mid yihiin Oroomo, Soomaali, Siidamo iyo Canfari).

Aqoonyahannada aan soomaali ahayni, hadday dhugtaan adeegsiga erayada *nambar* (erayga ingiriisida ah ee *number* sida odhaada "*imisa nambar baad taqaanaa?*"); ama *sifir* iyo *eber* oo ay ka waayaan afsoomaaliga erey xisaabeed u dhigma aragtida 0; ama *malyan, balyan* iwm, waxay shaki galin karaan in soomaalidu aanay hiddoba u lahayn aragtida tiro. Xaqiiqdu waxay tahay mid taa ka fog.

Waraaqdan waxaynu ku eegi doonnaa sida xisaab dhaqameedka soomaalida, iyo adeegsiga tiraduba, ay uga soo jeedaan dhugmo hore oo soomaalidu lahayd, islamarkaana erayada loo adeegsado tirooyinku ay asal ahaan ku abtirsadaan afsoomaaliga toolmoon ee soo jireenka ah. Sidaa darteed, waxaynu arki doonnaa in fikradda tirinta iyo tiradu aanay ahayn wax mar danbe soo gaadhay soomaalida, balse ay yihiin hidde iyo xaddaarad dhaqan oo soo jireen ah.

TIRADA

Guddigii afsoomaaligu waxay soo jeedisay 1972kii in tobanka sumadood ee salka u ah tirada qoran laga soo qaato kuwa ugu caansan ee adduunka laga adeegsado: 0, 1, 2, 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9; taasi oo ka danbaysay go'aankii guud ee ahaa in afsoomaaliga lagu qoro xarfaha laatiinka. Sumadahaas oo la yidhaahdo ``Arabic Numerals", waxaa lagu dejiyey Hindiya qiyaastii 400 NCH, waxayna soo gaadheen Beershiya xilligii Boqortooyada Islaamku ugu xoogga waynayd, sidaana ay Carabtu ugu gudbiyeen Yurub iyo Reer Galbeedka.

Tirooyinka nolosha caadiga ah lagu adeegsadaa waxay u dhigmaan kuwa xisaab ahaan loo yaqaanno tirooyinka *idil* ee *togan*, waana jawaabta ka soo baxda tirinta walxo kooban. Xisaab ahaan waxaa macnaha tiro lagu fidiyaa tirin walxo aan koobnayn, tiro *taban*, tirada la isla qaatay ee $i=\sqrt{-1}$, iwm; urruradaas oo dhammaantood u ah *hormo-urur ururka guud* ee tiro.

CAYNKA MAGACYADA TIROOYINKA

Afsoomaaliga, tirooyinka 1 ilaa 8 waa dhedig; 9, 10 iyo wixii eber ku dhammaadaana waa lab. Tirooyinka kale caynka waxa suga godka ugu

danbeeya iyo sida loo akhriyo. Tusaale 1292 waa:

- *dhedig haddii loo akhriyo kun laba boqol iyo sagaashan iyo laba;*
- *lab haddii loo akhriyo kun laba boqol iyo laba iyo sagaashan.*

Marka ay noqoto dhisidda weedh ee tiro-tirinta, magaca la tiriyay wuxuu ka dib dhacaa tirinta, waxaana uu ku nagaadaa keli hadii uu yahay lab. Tusaale ahaan:

- *laba nin,*
- *siddeed daayeer,*
- *saddex qalin.*

Haddiise uu magaca la tiriyay dheddig yahay, waxaa xagga danbe ka raaca dabagalaha "aad" amase "ood". Tusaale ahaan:

- *sagaal gabdhood,*
- *toban naylood,*
- *shan halaad,*
- *saddex waylood.*

Marka la tilmaamayo tiro horsiimo, magaca la tiriyay wuxuu had iyo jeer horgalaa tirada, waxaana uu ku ekaadaa kalinnimadiisa, ha ahaado lab ama dheddige. Tusaale:

- *maalinta shanaad,*
- *inanka kowaad,*
- *fasalka saddexaad, iwm.*

### *ASTO TIRO*

Asto tiro waa astaan ama astaamo wada jira oo lagu tilmaansado tiro. Asto tiro waxay noqon kartaa sumad amase hadal caadi ah oo lagu tilmaansado tiro. Astada tiro way ka duwantahay tirada sida ay magacyadu uga duwan yihiin waxyaabaha ay tilmaamayaan. Tusaale ahaan Astooyinka tiro ee 8, VIII waa laba asto tiro oo kala duwan balse labaduba waxay tilmaamayaan tirada siddeed.
Habdhis asto tiro waa hab qeexan oo ka kooban astooyin xaddidan, kuwaasoo ku-tarisane kasta oo ururka tirooyinka ka mid ah, si madi ah u tilmaanta.

### *TIRO TIRINTA*

Tiro tirintu waa jawaabta sheegta inta shay ee ay yihiin walxo la tiriyey, iyada oo aan loo eegin sida ay u kala horreeyaan. 1 (kow), 2 (laba), 3 (saddex), 4 (afar), 5 (shan), 6 (lix), 7 (toddoba), 8 (siddeed), 9 (sagaal), 10 (toban) waa salka tobanle ee tiro tirinta. Waxaa markaas raaca 11 (kow iyo toban), 12 (laba iyo toban), 13 (saddex iyo toban), … 20 (labaatan), 21 (kow iyo labaatan) … 30 (soddon), 40 (afartan), 50 (konton), 60 (lixdan), 70 (todobaatan), 80 (siddeetan), 90 (sagaashan), 100 (boqol), … 101 (boqol iyo kow), 102 (boqol iyo laba) … 110 (boqol iyo toban), 111 (boqol iyo kow iyo toban) … 120 (boqol iyo labaatan), … 1000 (kun), 10000 (toban kun), 100000 (boqol kun), … 1000000 (milyan), … 10000000 (toban milyan), … 100000000 (boqol milyan), … 1000000000 bilyan …

115,658,111,967 waxaa loogu dhawaaqaa: boqol iyo shan iyo tobanbilyan iyo lixboqol iyo sideed iyo kontonmilyan boqol iyo kow iyo tobankun iyo sagaalboqol iyo toddoba iyo lixdan.

### Tiro tilmaanta

*AAD - Soocaha tiro meeleeye: (tiro horsiimo)*

Soocahani waa mid kuu sheega tilmaanta tiro ee halka uu shay kaga jiro walxo la tiriyey. 1aad kowaad, 2aad labaad, 3aad saddexaad, 4aad afraad, 5aad shanaad, 6aad lixaad, 7aad toddobaad, 8aad siddeedaad, 9aad sagaalaad, 10aad tobnaad, 11aad kow-iyo-tobnaad, … 20aad labaatanaad, 30aad soddonaad, ..

*LAAB - Soocaha tiro ee dhufasane*

Marka la sheegayo tirooyinka idil ku dhufashadooda, waxaa la isticmaala soocaha ``laab", kaasoo sheega ``inta jeer ee xaddi u yahay dhufasane xaddi kale". Tusaale: labo (labanlaab), saddex (saddexlaab), afar (afarlaab), iwm.

*EEYE - Soocaha tiro ee suge*

Soocaha dib gala ee eeye waxa uu kuu tilmaamaa in xaddi aan la hubin sugnaantiisa, kaasoo ku siiya qiyaastii inta uu yahay waa ``eeye". Tusaale ahaan in ku dhow 10, waxaa la yidhaahdaa `tobaneeyo", 20 (labaataneeyo), iwm.

*LE - Soocaha tiro ee lahaansho*

Sooce kale oo tilmaama inta jeer ee xaddi ah ee uu shay ama qof leeyahay waa iyadoo tirada la raaciyo erayga ``le". Tusaale ahaan halle, labaale, saddexle, afarre (afarle), shanle, iwm.

*Tilmaanta tiro aan hubbanayn*

Erayada loo adeegsado marka tiro aanay sugnayn, amase aan la hubin, waxaa ka mid ah: in, dhawr, waxoogaa, iwm.

### Jajabka iyo afsoomaaliga

Afka soomaaliga waxa ku jira erayo u gaar ah jajabka. Tusaale ahaan sheekada "habardugaag" ee ku qoran [Muuse Haaji Ismaa'iil Galaal, B. W. Andrzejewski, 1956], waxaad arkaysaa erayadan soo socda sida loogu adeegsaday in la qaybqaybiyo tirada 1.

| | | |
|---|---|---|
| 1 | = | neef (tiro buuxda) |
| ½ | = | badh |
| ¼ | = | waax |
| 1/8 | = | falladh |
| 1/16 | = | rimic |
| 1/32 | = | miil |

Magacyadan iyo kuwa kale oo laga yaabo inay lumeen waxay sheegayaan in habka jajabka tiro ee afsoomaaligu uu yahay mid dhisaalan oo leh macno xisaabeed, kuna salaysan saami qaybeed toosan.

### Xidhiidhka tirada soomaalidu la wadaagto afafka kale ee kushitigga

Bahda afafka kushitigga iyo sida soomaaligu salka ugu leeyahay hore ayaa loo baadhay [eeg Leo Reinisch 1873; Cerulli 1957-59; Abdalla O Mansur, 1988;

Andrzejewski, 1960]. Waxaynuse halkan kusoo koobaynaa sida magacyada afsoomaaliga looga dhadhan san karo in tagtadoodii hore asal la leedahay afafka ay bahwadaagga leeyihiin afsoomaaliga ee kushitigga.

Waxaynu is barbardhigaynaa qaar ka mid ah afafka kushitigga iyo soomaaligu sida ay isugu eeg yihiin marka laga eego tobanka tiro ee u horreeya ee tiro tirsiimo [is barbardhiggan waxaa laga soo guuriyay Abdalla O Mansur, 1988]

| Tiro | Soomaali | Oroomo | Canfari | Siidaamo |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Kow | Tokko | Inki | Mite |
| 2 | Laba | Lama | Namma | Lame |
| 3 | Saddex | Sadii | Sidiha | Sase |
| 4 | Afar | Afur | Affara | Soole |
| 5 | Shan | Shan | Koona | Onte |
| 6 | Lix | Jaha | Liha | Leye |
| 7 | Toddoba | Torba | Malhin | Lamala |
| 8 | Siddeed | Saddeet | Bahra | Sette |
| 9 | Sagaal | Sagal | Sagla | Honse |
| 10 | Toban | Tama | Tobna | Tonne |

Marka laga tago isu ekaanshaha cajiibka ah ee erayo badan oo tusahan kore ku jira, waxaa iyana u baahan in la xuso, in arrinkani caddaynayo is beddelka ku dhaca erayga *konton* ee afka soomaaliga. Bal u fiirso labaatan(laba), soddon(saddex), afartan(afar), konton(??), lixdan(lix), toddobaatan (toddoba), iwm. Waxaynu arkayna sababta erayga konton isu beddelay ee uu u noqonwaayay 'shantan (shan)', in ay tahay canfariga oo ka xoog batay afafka kale. Bal eeg shan waxaa lagu yidhaahdaa canfariga koona, halkaas baana laga yaabaa inay ka timi konton.

### MAGACYADA GAARKA AH EE TIRO GO'AN OO XAWAYAAN AH

Hodannimada afka soomaaliga waxa tusaale u ah erayo badan oo macno isku mid ah sameeya, balse loo kala beddelo adeegsigooda kolba waxa markaas laga hadlayo. Sheegista tiro ayaa haddaba erayo badan loo kala adeegsadaa marka la tilmaamayo xayawaanka, gaar ahaan duurjoogta. Kuwani waa erayo laga soo ururiyey abwaannada iyo qaamuusyada tixraaca hoose ku tilmaaman:

| Magac | Macne |
|---|---|
| lammaane | laba qof ama laba noole oo isku jinsi ah. |
| dan | lammaane sakaarooyin ah. |
| iskushub | lammaane goroyooyin ah. |
| iswad | lammaane biciiddo ah. |
| qindi | lammaane dibiyo ah oo la isugu xidho beer qod. |
| adaf | saddex ama in ka badan oo deerooyin ah |
| adan | saddex am in ka badan oo dabeer dibadeed ah; saddex ama in ka badan oo libaaxyo ah. |
| gawar | saddex ama in ka badan oo gorayo ah; raxan gorayo ah. |
| goosin | saddex ama in kabadan oo dibtaag ah. |
| labaab | saddex ama in ka badan oo goodir ah. |

| | |
|---|---|
| raxan | saddex ama in ka badan oo duurjoog ah. |
| yahaab | saddex ama in ka badan oo biciiddo ama xayawaan wayn ah. |
| fadhi | 100 lo' ah. |
| illin | 100 geel ah. |
| kadin | 100 halaad iyo wixii ka badan. |
| tiro | 100 adhi ah. |
| wegen | boqol dameero, baqlo ama fardo ah |

*EREY BIXIN XISAABEED*

Ereyadan halkan ku sheeggan ee kor lagu adeegsaday macnuhu ma ah in lagu erey bexiyey waraaqdan e waa ereyo-xisaabeedyo hore u jiray. Waxaa halkan loogu sharxay si u u fududaado fahankoodu.

| **Erey** | **Macnaha** |
|---|---|
| *estimate* | hilaadin |
| *do an estimation* | hilaadi |
| *integer* | tiro idil |
| *numeral* | asto tiro |
| *numeral system* | habdhis asto tiro |
| *odd number* | tiro kisi |
| *even number* | tiro dhaban |
| *set* | urur |
| *subset* | hormo-urur |
| *square root* | xidid laba jibbaar |
| *upper set* | urur guud |

*TIXRAAC*

1. Abdalla O. Mansur, 1988 Le lingue Cuscitiche e il Somalo, STUDI SOMALI 8, Roma.

2. Abdirahman A Farah "Barwaaqo", 1995, Abwaan cusub oo af-soomaali iyo afingiriisi ah, Ottawa.

3. Annarita Puglielli, 1998, Dizionario Italiano-Somalo, Roma, Univerista' degli Studi Roma Tre.

4. Andrzejewsk, 1960, The categories of number in noun forms in the borama dialect of galla, London, "Africa", No. 1, 62-75.

5. Cerulli E. 1957-59, Somalia: scritti vari editi e inediti, Roma, Istituto Poligrafico dello Stato.

6. Muuse Haaji Ismaa'iil Galaal, B. W. Andrzejewski, 1956, Hikmad Soomaali, London, Oxford University Press.

7. Reinisch L., 1873, Der einheitliche Ursprung der Sparchen der Alten Welt nachgewiesen durch Vergleichung der afrikanischen, erythraischen und indogermanischen Sparchem mit Zugrundelegung des Teda, Holder, Wien.

8. Saalax Xaashi Carab, 2004, QAAMUUS, Jabbuuti, Machadka afafka ee xarunta cilmibaadhista Jabbuuti.

9. Squillacciotti M, 1996 Il sistema di numerazione tradizionale in Somalia in "Antropologia del numero", CNR, Brescia.

10. Yaasiin C Keenadiid, 1976, Qaamuuska af-soomaaliga, Wasaaradda hiddaha iyo tacliinta sare, akademiyaha dhaqanka.